| | |
|---|---|
| جمهورية مصر العربية<br>وزارة الأوقاف | 15 شعبان 1443هـ<br>18 مارس 2022م |

(1)

# Isbahaysiga qaranka ee wax ka qabashada dhibaatooyinka

Mahad Allaa iska leh, Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:

{وَتَعاوَنُوا عَلَى البِرِّ وَالتَّقْوَى}

**(Isugu kaalmeeya samaha iyo dhawrsiga)**

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame

intaas kaddib:

Bulshooyinka sarsare waa bulshooyin isku xiran oo is caawiya oo iskaashada, siiba waqtiyada dhibaatada, wuxuu ku tilmaamay nabiga (naxaiis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) bulshooyinkan qiimaha leh oraahdiisa:

**(مَثَلُ المُؤْمِنِينَ فِي تَوَادِّهِمْ وَتَرَاحُمِهِمْ وَتَعاطُفِهِمْ كَمَثَلِ الجَسَدِ، إِذَا اشْتَكَى مِنْهُ عُضْوٌ تَدَاعَى لَهُ سَائِرُ الجَسَدِ بِالسَّهَرِ وَالحُمَّى)،**

**(Mu'miniinta tusaalahooda xagga isjacaylkooda iyo isu naxariisashadooda iyo isu dhimrintooda waa sida jirka oo kale, marka xubin ka sheegato jirka oo dhan dhafar iyo qandho ayuu ka sheegtaa) wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee)**:

**(الْمُؤْمِنُ لِلْمُؤْمِنِ كَالْبُنْيَانِ يَشُدُّ بَعْضُهُ بَعْضًا، وَشَبَّكَ بَيْنَ أَصَابِعِهِ).**

**(Mu'minka wuxuu u yahay mu'minka kale dhis oo kale qaarkii qaarka kale ayuu adkeeyaa, farahiisa ayuu is dhexgaliyay)**

Fiqiga dhibaatooyinka wuxuu rabaa isbahaysi qaran iyadoo loo soo marayo arrimo ay ka mid yihiin: in laga fogaado qishka iyo ixtikaarka iyo daneysiga nooc walba ha ahaadee, diinta xaniifta ah si daran ayay u reebtay cuduradaas foosha xun, qishka noocyadiisa oo dhan si adag ayaa laysaga reebay, wuxuuna ahaa waxyaalaha ugu horreeyay ee ka mid ah quraanka kariimka Madiina almunawara kusoo dego, wuxuu yiri Allaha sarreeya:

**{وَيْلٌ لِلْمُطَفِّفِينَ * الَّذِينَ إِذَا اكْتَالُوا عَلَى النَّاسِ يَسْتَوْفُونَ * وَإِذَا كَالُوهُمْ أَوْ وَزَنُوهُمْ يُخْسِرُونَ * أَلَا يَظُنُّ أُولَئِكَ أَنَّهُمْ مَبْعُوثُونَ * لِيَوْمٍ عَظِيمٍ * يَوْمَ يَقُومُ النَّاسُ لِرَبِّ الْعَالَمِينَ}،**

**(Waxaa halaag u sugnaaday kuwa xaqa nusqaamiya * Waa kuwa markay miisina oofsada (dhammaystirta) * Markay u miisi ama u miisaamina ka nusqaamiya * Miyayna u malaynaynin kuwaasi in loo soo bixin * Maalin wayn darteed (Qiyaamada) * Maalinta Dadku u istaagi Eebaha Caalamka),** wuxuu leeyahay Alle (SW) asoo ka hadlaya sayidkeena Shucayb (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**{وَيَا قَوْمِ أَوْفُوا الْمِكْيَالَ وَالْمِيزَانَ بِالْقِسْطِ وَلاَ تَبْخَسُوا النَّاسَ أَشْيَاءَهُمْ وَلاَ تَعْثَوْا فِي الأَرْضِ مُفْسِدِينَ}،**

**(Qoomkayow oofiya Miisidda iyo miisaanka si cadaalada hana ka nusqaaminina Dadka waxooda Dhulkana ha fasaadinina),** wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(مَنْ غَشَّنَا فَلَيْسَ مِنَّا)**

**(Qofkii na qayaamo naga mid ma aha)**

Sidoo kale sharciga xaniifka ah wuxuu reebay dhammaan noocyada ixtikaarka iyo daneysiga, maxaayeelay waxaa ku sugan in lagu cayaaro quudka dadka iyo noloshooda, iyo in la qabsado; si loo helo faa'idooyin aan la jideynin iyadoo laga faa'ideysanayo dhibka dadka iyo rafaadkooda, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah (SW):

**{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لاَ تَأْكُلُوا أَمْوَالَكُمْ بَيْنَكُمْ بِالْبَاطِلِ إِلاَّ أَنْ تَكُونَ تِجَارَةً عَنْ تَرَاضٍ مِنْكُمْ وَلاَ تَقْتُلُوا أَنْفُسَكُمْ إِنَّ اللَّهَ كَانَ بِكُمْ رَحِيمًا}،**

**(Kuwa (xaqa) rumeeyow ha cunina xoolihiina dhexdiinna si baadil ah (xaaraam ah) inuu jiro ganacsi aad raalli isaga tihiin mooyee, hana dilina naftiinna, Alle wuxuu idiin yahay naxariistee)** wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(كُلُّ الْمُسْلِمِ عَلَى الْمُسْلِمِ حَرَامٌ، دَمُهُ، وَمَالُهُ، وَعِرْضُهُ)،**

**(muslinka muslinka kale xaaraan buu ka yahay dhiiggiisa iyo hantidiisa iyo sharaftiisa)**, wuxuu leeyahay nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(لَا يَحْتَكِرُ إِلَّا خَاطِئ)**

**(Ixtikaar ma sameeyo qof gef ku jiro mooyee)**, midka ixtikaarka sameeya raganimo iyo qarannimo ma laha, maxaayeelay nafjeclaysigiisa ayaa ka sara mariyay diinta iyo qaranka iyo dadnimada; sidaa awgeed wuxuu mutaystay carada Alle (cazza wajalla) iyo nacaybka dadka.

Hadduu ogaan lahaa kan ixtikaarka sameynaya oo daneystaha ah maalka uu ka helayo ixtikaarkiisa iyo daneysigiisa inuu ku noqonayo culeys korka ka saaran maalinta qiyaamaha taas waxay u ahaan lahayn mid ka reebta dulmigaas, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa (SW):

**{وَمَنْ يَغْلُلْ يَأْتِ بِمَا غَلَّ يَوْمَ الْقِيَامَةِ}**

**(Ruuxii wax Khayaama wuu la Imaan wuxuu Khayaamay Maalinta Qiyaame,)**, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(الْجَالِبُ مَرْزُوقٌ وَالْمُحْتَكِرُ مَلْعُونٌ)،**

**(Kan (badeecada) keenaya waa la arsaaqayaa kan ixtikaarka sameeyana waa la lacnadayaa)** wuxuu leeyahay nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(تَعِسَ عَبْدُ الدِّينَارِ، وَالدِّرْهَمِ).**

**(Waxaa halaagsamay addoonka diinaarka iyo dirhamka)**

Ganacsadaha wadaniga oo runlowga ah waa kan aan qishin oo aan khayaamin oo aan sirin, balse wadaninimadiisa waxay ku riixdaa gaar ahaan waqtiyada dhibaatada inuu yareeyo ribxigiisa asoo dadka ka fududeynaya, shaki kama taagna taas inay ka mid tahay isu naxariisashada oo ajirka laga helo, Alle (caza wa jalla) wuxuu ugu ballanqaaday carrabka nabigiisa (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) ganacsadaha runlowga ajir weyn wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(التَّاجِرُ الصَّدُوقُ الأَمِينُ مَعَ النَّبِيِّينَ، وَالصِّدِّيقِينَ، وَالشُّهَدَاءِ)،**

**(Ganacsadaha runlowga ah oo aaminka ah wuxuu la jiraa anbiyada iyo siddiiqiinta iyo shuhadada),** wuxuu leeyahay nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(رَحِمَ اللهُ رَجُلاً سَمْحًا إذا باعَ، وإذا اشْتَرى، وإذا اقْتَضى).**

**(Ilaahay ha u naxariisto nin saamaxaya markuu wax iibinayo iyo markuu wax iibsanayo iyo markuu wax gudanayo)**

****

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato midka lagu khatimay anbiyada iyo rususha sayidkeenna Muxammad (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), iyo dhammaan ehelkiisa iyo asxaabtiisa.

Waqtiyada dhibaatada waxay rabaan in wax la huro ee ma aha in wax nafta lala jeclaado iyo in dadka laga faa'ideysto, sidoo kale waxay rabaan in laysu naxariisto ee ma aha in naxariisdarro iyo nafjeclaysi lala yimaado, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(مَا آمَنَ بِي مَنْ بَاتَ شَبْعَانَ وَجَارُهُ جَائِعٌ إِلَى جَنْبِهِ وَهُوَ يَعْلَمُ بِهِ)،**

**(Ima rummaynin qofkii bariyo asoo dersikiisa dhiniciisa ku gaajaysan yahay asoo og)**, sidoo kale waxay rabaan in laysu naxariisto iyo in wax la huro oo wax la bixiyo, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa (SW):

**{وَيُؤْثِرُونَ عَلَى أَنفُسِهِمْ وَلَوْ كَانَ بِهِمْ خَصَاصَةٌ وَمَن يُوقَ شُحَّ نَفْسِهِ فَأُولَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ}**

**(waxayna Naftooda ka hormariyaan (ay uga doori) dadkaas inkastaba iyagu gaajo ha haysee, ruuxii laga dhawro bakhaylnimada Naftiisa waa mid Liibaanay)**, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(إِنَّ الأَشْعَرِيِّينَ إِذَا أَرْمَلُوا فِي الغَزْوِ، أَوْ قَلَّ طَعَامُ عِيَالِهِمْ بِالمَدِينَةِ جَمَعُوا مَا كَانَ عِنْدَهُمْ فِي ثَوْبٍ وَاحِدٍ ثُمَّ اقْتَسَمُوهُ بَيْنَهُمْ فِي إِنَاءٍ وَاحِدٍ بِالسَّوِيَّةِ، فَهُمْ مِنِّي وَأَنَا مِنْهُمْ).**

**(Ashcariyiinta markay xiliga dagaalka hanti waayaan ama cuntada caruurtooda magaalada ku sugan ay yaraato waxay ku soo ururiyaan hal maro waxa ay haystaan, kadib ayay ugu qeybsadaan si isla eg, iyaga way iga mid yihiin anigana iyagaan ka mid ahay)**

Shaki kama taagna isbahaysigan inuu kaalin weyn ka qaato xoojinta xiriirka bulsheed iyo midka insaaniyada, iyo in la

kobciyo jacaylka iyo kalgacalka bulshada dhexdeeda, sidaa awgeed shareecada islaamka qiimaha leh waxay ku boorrisay arrintaas, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa (SW):

{وَتَعَاوَنُوا عَلَى الْبِرِّ وَالتَّقْوَى وَلَا تَعَاوَنُوا عَلَى الْإِثْمِ وَالعُدْوَانِ}،

**(Isugu kaalmeeya samaha iyo dhawrsiga hana isugu kaalmaynina dambi iyo colnimo)**, isbahaysigan iyo iscaawintan waxay kasoo muuqanayaan marka meelaha khayrka wax lagu bixinayo, gaar ahaan waxyaalaha la xiriira quudinta cuntada iyo daboolidda baahida dadka tabaalaysan wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah (SW); markuu tilmaamayay dadka isaga ka baqa oo baarriyaasha ah:

{وَيُطْعِمُونَ الطَّعَامَ عَلَى حُبِّهِ مِسْكِينًا وَيَتِيمًا وَأَسِيرًا* إِنَّمَا نُطْعِمُكُمْ لِوَجْهِ اللَّهِ لاَ نُرِيدُ مِنكُمْ جَزاءً وَلاَ شُكُورًا * إِنَّا نَخَافُ مِن رَّبِّنَا يَوْمًا عَبُوسًا قَمْطَرِيرًا * فَوَقَاهُمُ اللَّهُ شَرَّ ذَلِكَ الْيَومِ وَلَقَّاهُمْ نَضْرَةً وَسُرُورًا* وَجَزَاهُمْ بِمَا صَبَرُواْ جَنَّةً وَحَرِيرًا}،

**(Waxayna Quudiyaan iyagoo jecel miskiinka Agoonka iyo kan qafaalka ah * Iyagoo Dhihi waxaan idiin quudinnay dar Alle, mana idinka doonayno Abaalmarin iyo Mahadnaq Midna * Waxaan ka Yaabaynaa Eebahanno Maalin (wajigu) doorsoomi oo Daran * Eebana waa ka Dhawray sharka Maalintaas, wuxuuna siiyay nuur iyo Farax * Wuxuuna ku abaal Mariyay Samirkooda Dartiis jano iyo Xariir)** wuxuu leeyahay Alle (SW) asoo tilmaamaya dadka midigka xiga:

{أَوْ إِطْعَامٌ فِي يَوْمٍ ذِي مَسْغَبَةٍ* يَتِيمًا ذَا مَقْرَبَةٍ* أَوْ مِسْكِينًا ذَا مَتْرَبَةٍ}،

**(Iyo cunno la siiyo maalin gaajo * Agoon kuu dhaw * Ama Miskiin Dhulka ku dhagay (dhibaato darteed)),** wuxuu leeyahay nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(أَطْعِمُوا الطَّعَامَ، وَصِلُوا الْأَرْحَامَ، وَصَلُّوا بِاللَّيْلِ وَالنَّاسُ نِيَامٌ تَدْخُلُوا الْجَنَّةَ بِسَلَامٍ)،

**(dadka cunta quudiya qaraabadana xiriiriya habeenkana tukada dadka iyagoo hurdaya jannada aad ku gashiinee**

**nabadgalyo),** wuxuu leeyahay nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(خِيَارُكُمْ مَنْ أَطْعَمَ الطَّعامَ).**
**(kiina ugu fiican waa midka dadka cunta siiya)**

**Ilaahayow ilaali dalkeena Masar iyo dhmmaan dalalka caalamka**